Equalities In Health

NHS Greater Glasgow and Clyde

# Xuquuqdaada Daryeelka Hooyada



## Hage Tilaabo-Tilaabo ah

NHS Greater Glasgow & Clyde waxaa ka go’an inay bixiso daryeel hooyenimo oo tayo sare leh iyo in ay hubiyaan in qof kasta oo noo yimaada loola dhaqmo si cadaalad ah oo ixtiraam iyo xushmad leh. Waxa aad leedahay xuquuq marka aad isticmaaleyso mid kasta oo ah adeegyadeena. Tusaale ahaan, waxa aad xaq u leedahay inaadan la kulmin ama laguu geysan cunsuriyad ama nooc kale oo takoorid ah.

Waxa aad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho taageero madax-banaan, sida qof ka socda urur samafal ah , si uu ku caawiyo muddada daryeelkaaga. Hagaheena ah tillaabo-tilaabada ah wuxuu sharxayaa heerarka kala duwan ee daryeelkaaga xilliga uurka ka hor iyo uurka ka dib.

Tan waxa ku jira xaqa aad u leedahay in aad hesho taageero turjumaan marka aad isticmaalayso adeegyadayada, nambarada telefoonada muhiimka ah iyo sida loo isticmaalo adeega turjubaanka taleefoonka si aad u wacdo.

## Tilaabada 1aad

### Iska soo qor ama iska soo diiwaangali daryeelka hooyada

Balan la sameeyso umuliso adiga oo la xiriiraya xafiiska isdiwaangalinta isla marka aad ogaato inaad uur leedahay.

Waxaan ku boorinaynaa dhammaan hooyooyinka uurka leh, xataa kuwa caruur horey u dhalay, inay iska qoraan oo ay iska diiwaangaliyaan adeegga hooyada ee xaafada inta u dhaxaysa toddobaadyada 6 iyo 10 ee uurkaaga.
Baadhitaano caafimaad iyo baadhisyo lagu hubinayo in dhammaan adiga iyo ilmahaagu ay caafimaad qabaan ayaan waxa ay dhacayaan marxaladaha hore ee uurkaaga marka waa muhiim in aad is qorto goor hore iyo inaad hubiso inaad soo xaadirto dhammaan ballamahaaga.

Umulisadaadu sidoo kale waa ay kula shaqayn doontaa si ay kaaga caawiso inaad fahanto xaaladaada oo ay kaala hadasho wixii taageero iyo daryeel dheeraad ah oo aad u baahan karto inta aad uurka leedahay.

Lambarka xafiiska isqorista ama is diwaangalinta waa 0141 347 8422

Waxaad isticmaali kartaa adeegga turjumaada taleefanka si aad u wacdo.

Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato xubinta shaqaalaha tarjumaada taageerada tan iyo dhammaan ballamaha mustaqbalka.

## Tilaabada 2aad

### Ka soo qeyb galida balamaha

Waxaad arki doontaa kaliya 1 ama 2 umuliso oo kala duwan inta lagu jiro daryeelkaaga uurka, si ay kaaga caawiyaan inaad dhisto kalsooni iyo si ay kaaga caawiyaan xiriirka iyo isgaarsiinta. Waxa aad xaq u leedahay inaad su’aalo waydiiso ama inaad weydiiso sharaxaad dheeri ah hadii aadan fahmin ama aysan ku kuu caddayn waxa la sheegayo. Inta lagu jiro booqashadaada koowaad ama ugu horreysa, umulisadu waxa ay ka codsan doonta ama ay weydiisan doontaa qof kasta ama cid walba oo taageera bixinayaya inuu banaanka ama dibada aado dhowr daqiiqo si ay kuugu oggolaato oo ay kuu siiso wakhti gaar ah oo aad ku weydiiso su’aalo. ani waa nidaamka caadiga ah ee dhammaan hooyooyinka uurka leh.. Daryeelkaagu wuxuu ka dhici karaa meel u dhow gurigaaga. Haddii aad ku jirto faai’dooyinka badbaadada bulshada, waxaa laga yaabaa inaad awood u leedahay inaad dib u soo sheegato kharashyada safarkaaga. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u xaq u leedahay Deeqaha Bilowga ugu Fiican, Cuntooyinka Bilawga ah ee ugu Fiican iyo Lacag bixinta Ilmaha Iskotishka. Kaliya weydii xubin ka mid ah shaqaalaha arrintan. Fadlan sidoo kale la hadal umulisadaada hadii ay dhibaato kaa haysato helitaanka ballamahaaga.
Waxa aad xaq u leedahay inaad ku hesho dhammaan macluumaadka luqadda aad adigu doorbidayso. Tani waxaa ka mid ah sidaad u ilaalin lahayd naftaada iyo ilmahaaga inta aad uurka leedahay, macluumaad ku saabsan baaritaanka lagu siin doono iyo u diyaarinta naftaada inaad umusho. Waxaa sidoo kale ku jira qorsheynta daryeelka ilmahaaga iyo doorashooyinka quudinta. Inta lagu jiro xilliga uurka iyo dhalmada, umulisadaada ayaa tan kaala hadli doonta oo kula wadaagi doonta. Hadii aad dareemayso inaadan helin macluumaadkan, fadlan weydiiso xubin ka mid ah shaqaalaha si uu tan kaala sii hadlo.

3

## Tilaabada 3aad

# Fasalo iyo classes xiliga uurka iyo dhalmada ka hor ah

Fasalada ama galaasyada dhalmada ka hor waxay daboolayaan oo lagu dhiganayaa arrimo iyo mawduucyo muhim ah oo ku saabsan
sida sida loogu diyaargaroobo foosha, iyo waxyaabha laga yaabo inaad u baahato, sida aad u quudin lahayd ilmahaaga iyo sida aad naftaada u daryeeli lahayd.
Waxa aad codsan kartaa turjumaan si ay u soo xaadiraan oo ay kuula joogaan fasaladan. Turjubaanku waa uu ku ag fadhiisan doona oo si dagan ayuu kuugu turjumi doona waxa la dhigayo iyo waxa laga hadlayo iyo wixii kale ee su'aalo ah ee aad qabtid.

Lammaanahaaga / lamaanahaga taageeraha ah sidoo kale waxa uu soo xaadiri karaa oo uu ka qeyb qaadan karaa fasalada uurka iyo dhalmada ka hor laguugu dhigayor. Waxa ay heli doonaan macluumaad iyo talo ku saabsan sidii ay ku taageeri lahaayeen inta aad uurka leedahay, xilliga foosha iyo ka dib marka ilmuhu dhasho. Waxay sidoo kale baran doonaan xirfado ku saabsan sida loo daryeelo ilmahaaga.

Xog ku saabsan qorsheynta qoyska ka dib marka ilmahu dhasho ayaa sidoo kale la heli karaa oo diyaar ah.

4

## Tilaabada 4aad

# Sameynta qorshaha dhalmada

Waa inaad kala hadashaa umulisadaada qorshaha dhalmada. Tan waxaa ku jiri kara qofka aad rabto inuu kula joogo marka aad foolanayso iyo sidoo kale dookhyadaada waxyaabaha ay ka mid yihiin inaad ku dhasho meel ama goob biyaha leh, inaad guriga ku dhoso, iyo xanuun joojiye ama xanuun baabiye, taageero cunto iyo turjubaan.

Shaqaaluhu waxaa laga yaabaa inaysan mar walba awoodin inay raacaan dookhaaga iyo waxa aad rabto marka aad foolanayso taas oo ay ugu wacan tahay arrimo caafimaad, laakiin tani waa in laguu sharaxaa. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in foosha lagugu kiciyo ama lagugu bilabo (daawo lagu siiyo si aad u fool u bilawdi).Haweenka qaar ayaa laga yaabaa inay u baahdaan in lagu qalo ilmaha oo qaliin ay ku dhalaan. Umulisadaada ayaa kuu sharxi karta hababkan waxayna kaaga jawaabi kartaa su'aalo kasta oo aad qabtid.

## Tilaabada 5aad

## Dhalashada ilmahaaga

Haweenka badankoodu waxay hiigsanayaan ama jecel yihiin inay ilmahooda ku dhalaan cusbitaalka. Hadii aad u malaynayso inaad foolanayso, fadlan wac cisbitaalka aad ku iska diiwan galisay –

Princess Royal Maternity Hospital
0141 201 3453/3454

Queen Elizabeth Maternity Hospital
0141 232 4363

Royal Alexandra Community
Maternity Unit
0141 314 7033

Royal Alexandra Maternity Unit
Labour Ward
0141 314 6067

Vale of Leven Community
Maternity Unit 8am-8pm*
01389 817232

Inverclyde Community
Maternity Unit 8am-8pm*
01475 504619

*Wicitaanka xilliyada laga maqanyahay shaqada Royal Alexandra Hospital Labour Ward on 0141 314 7033

Umulisada ayaa ka hadli doonta waxa dhacaya waxayna kugula talin doontaa waxaad samayn lahayd.
Waxaad isticmaali kartaa adeegeena turjubaanka telefoonka si aad tan u sameeyso.
Markaad foolanayso, waxaad xaq u leedahay inaad ka qayb qaadato dhammaan go'aamada la samaynayo, oo ay ku jiraan xanuunka dhimista. Hadii aad dareemayso inaadan helin heerka xanuunka dhimista ee aad u baahan tahay, adlan u sheeg xubinta shaqaalaha ee jooga ama waydii inaad la hadasho xubin kale oo shaqaalaha ah haddii aad doorbidayso. Waxaad codsan kartaa taageerada turjumaanka xilliga foosha.

## Tilaabada 6aad

## Daryeelka dhalmada kadib

Hadii aad cusbitaal ku jirto ka dib marka aad dhashay ilmahaaga, waxa aad xaq u leedahay taageerada turjubaanka marka aad kala hadlayso umulisooyinka iyo dhakhaatiirta arrimaha ugu muhiimsan ee daryeelkaaga.

Mar walba waa in lagu taageero si aad u quudiso ilmahaaga oo aad naftaada u ilaaliso sida aad dooratay.
Marka aad guriga joogto, waxaa ku soo booqan doonta umuliso dhawr jeer ilaa 10 maalmood kadib markaad dhasho ilmahaaga. Booqde Caafimaad waa inuu soo booqdaa adiga iyo ilmahaaga laga bilaabo maalinta 11 - 14. Waxa ay sidoo kale ku soo booqan doonaan goor dambe ee uurkaaga si ay kuu gartaan oo ay u hubiyaan hubi in wax walba ay wanaagsan yihiin.
Booqdahaaga Caafimaadka ayaa kuu sheegi doona waxyaabaha sida rugaha
tallaalka dhallaanka.
Waxay kaloo kuu qabanqaabin karaan taageero turjubaan booqashooyinkan.



**Isticmaal adeegga turjumaada taleefanka si aad u wacdo adeeg kasta oo NHS ah.**

Taleefanka 01413194694

Waxaa lagu weydiin doonaa lambarkaaga biinka bukaanka. Tani waa 182987.

Kadib waxa lagugu xidhayaa turjumaan 15 ilbiriqsi gudahood.

U sheeg turjubaanka lambarka aad rabto inaad wacdo, tusaale ahaan 0141 347 8422

(Boojinta Hooyada)

Waxaad u isticmaali kartaa adeeggan inaad wacdo mid ka mid ah adeegyadayada, oo ay ku jiraan NHS24 (111) iyo Adeegyada Gurmadka (999).



**Waxaad xaq u leedahay inaad hesho turjumaan dhammaan ballamahaaga.**

U sheeg xubinta shaqaalaha haddii aad jeclaan lahayd taageerada turjubaanka ballamahaaga. Tani waxay noqon kartaa turjumaan fool ka fool ah ama adeegga turjumaada taleefanka.

Haddii aad isticmaalayso turjumaan fool ka fool ah, waxa aad si gaar ah u codsan kartaa tarjumaan dheddig ama lab ah, laakiin waxa laga yaabaa in aanay mar walba diyaar ahayn markaa haddii aad doorbidayso arrintan waxa laga yaabaa in aad u baahato in aad sugto muddo dheer.

Fadlan ogow in ay tahay siyaasadda NHSGGC in la isticmaalo turjubaano xirfad leh si ay kaaga taageeraan daryeelkaaga, ma aha xubnaha qoyska ama asxaabta.

**Maxaad samayn lahayd haddii aad rabto inaad ka cabato daryeelkaaga**

Adeegga Talo-bixinta Bukaan-socodka iyo Taageerada ayaa kaa caawin kara inaad bixiso jawaab celin ama faallooyin, kor u qaad welwelka, ama aad cabasho ka samayso daawaynta aad ka heshay NHS-ta.

Nagala soo xidhiidh 0800 917 2127.

Waxaad isticmaali kartaa our adeegga turjubaanka telefoonka si aad u wacdo.





NHS Greater Glasgow and Clyde

Equalities In Health

Maxaa la sameeynaynaya marka ay xaalad degdeg ah timaado ama dhacdo
Hadii aad leedahay wax dhiigbax ah ama calool majiiris ama xanuun kaas oo kaa haya qeybta hoose ee caloosha taasi macnaheedu ma ahan inaad ilmo dhicis ah dhalayso; waa wax iska caadi ah in xoogaa dhiigbax aad yeelato mar mar gaar ahaan 12ka todobaad ee ugu horeeya uur qaadida ama marka aad uurka yeelato.Midani waxaa loogu yeelaa qatar dhicis.
Dumarka intooda badan waxa ay yeeshaan uur caafimaad qaba laakiin dumarka qaarkood ayaa mararka qaar yeesha ama dhala caruur dhicis ah.
Hadii aad leedahay uur ka yar 12 toddobaad islamarkaana aad leedahay calool xanuun ama dhiigbax u tag Waaxda Shilalka iyo Gurmadka ee kuugu dhow.
Waa inaad sidoo kale tagtaa qeybta ama waaxda gurmadka ee kuugu dhow ama wac Ambalaas (999) hadii aad -

- yeelato calool xanuun aad u daran (kaasoo laga yaabo inuu hal dhinac uun kaa haayo)
- yeelato xanuunka garabka ah.
- U Dhiigbaxayso si ka culus sidii hore (aad soo deynayso xinjiro ama marada xaga hoose kuugu xiran ay aad u qoyeyso 30 kii daqiiqaba)
- dareento xaalad suuxdin ah ama dhicid ah.In an emergency situation, you can communicate with staff using telephone interpreting, which they can access for you.

Hadii aad leedahay uur ka weyn 12 toddobaad islamarkaana aad la kulmayso dhiig-bax ama xanuun, ama aad isku aragto mid ka mid ah calaamadaha kor ku xusan, waa inaad wacdaa wixii talo dheeraad ah qaybta qiimaynta hooyada ee isbitaalka kaas oo aad uurka aad ku balansatay.

| | |
|---|---|
| Queen Elizabeth University Hospital | **0141 232 4363** |
| Princess Royal Maternity Hospital | **0141 211 3453/3454** |
| Royal Alexandra Hospital | **0141 314 6067** |
| Vale of Leven Hospital 8am-8pm* | **01389 817 411** |
| Inverclyde Royal Hospital 8am-8pm* | **01475 504 619** |
| *Wacida saacadaha shaqada ka baxsan Isbitaalka Royal Alexandra oo socda | **0141 314 6067** |

Waxaad isticmaali kartaa adeegga turjubaanka telefoonka si aad u wacdo mid ka mid ah lambaradan.